# Waxaad u Diyaar Noqotaa Shir Lagu Guuleysto

### SHIRKA KA HOR

- Wax ka ogow su'aalaha ilmahaaga uu qabo iyo waxyaabaha xagga dugsiga uu ka walwal qabo.
- Waxaad eegtaa warbixinta horumarka, kaarka darajooyinka iyo daruusta uu ilmahaaga aqalka u soo qaato.
- Waxaad qortaa liis su'aalo ah ee aad doonaysid in aad macallinka wax ka waydiisid. Waxaad ka billawdaa foomka buug gacmeedka ku yaal kaddibna wax ku dar. Liiska hore kulanka ugu soo qaado.
- Waxaad qortaa macluumaadka ilmahaaga ku saabsan ee ah in macallinku wax ka ogaado, sida geeri qoyska ku timid, furriin, isbeddel xagga dhaqaalaha, xanuun ama aqal cusub.
- Haddii af Ingiriis uusan ahayn luqaddaada hore, qof ha la xiriiro dugsiga shirka waalidka-macallinka ka hor oo ha la waydiisto turjubaan ku caawiya xilliga uu kulanka jiro.

### SHIRKA

- Macallinka ha billaabo hadalka balse hubi in aad waydiisid su'aalaha liiskaaga ku yaal inta uusan waqtiga dhammaan.
- Waxaad waydiisaa macallinka waxa ilmahaagu tahay in ay ogaadaan oo ay sameyn karaan inta ka horreysa dhammaadka sanad dugsiyeedka. Waxaad sameysataa qorshe ah sida adiga iyo macallinka aad ula shaqeyn kartaan ilmahaaga si ay u gaaraan ujeeddooyinkan.
- Wax ka ogow qaabka ugu fiican (qoraallo, taleefoon, e-mail) iyo saacadda ugu fiican ee lala xiriiri karo macallinka inta lagu guda jiro sanad dugsiyeedka.

# Xiriirkaasi Ha Socdo Sanadka oo Idil

### SHIRKA KADDIB

- Waxaad ilmahaaga kala hadashaa waxa uu macallinka kuu sheegay, gaar ahaan waxyaabaha fiican. Waxaad kala hadashaa ujeeddooyinka waxbarashada waxaadna wada sameysataan qorshe aad ku wada gaartaan.
- Dabagal dhowrkii asbuucba qorshaha aad wada garteen ilmahaaga iyo macallinka.
- Maalin kasta waxaad ka eegtaa boorsada ilmahaaga daruusta dugsiga ee ah in aqalka looga shaqeeyo. Wada akhri. Haddii af Ingiriis uusan ahayn luqaddaada hore, waxaad waydiisaa qof qaraabo ama saaxib ah in luqaddaada kugu akhriyaan macluumaadka dugsiga uu kuu soo diro.
- Waxaad la xiriirtaa macallinka markasta ee aad su'aalo qabtid. Haddii ilmahaagu uusan ku hagaagsaneyn dugsiga, waxaad sameysaa jadwal joogta ah ee aad macallinka kula eegaysid horumarka ilmahaagu sameeyo. Haddii af Ingiriisi uusan ahayn luqaddaada hore, waxaad heshaa saaxib kaa caawiya sidii aad kula xiriiri lahayd macallinka ama aad turjubaan u waydiisan lahayd xafiiska dugsiga.
- Waxaad macallinka u dirtaa qoraal mahad-noq ah markii uu wax fiican ka dhaco fasalka.
- Waxaad hubisaa in ilmahaagu ogsoon yahay in dugsiga uu muhiim yahay. Maalin kasta waxaad ilmahaaga kala hadashaa dugsiga, waxaad ka qayb gashaa munaasibooyinka dugsiga, waxaad u soo jeedisaa in aad aqalka ku caawisid, si mutadawacnimo leh fasalka uga qayb qaado, waxaad ka mid noqotaa hay'adda waalidka.

## David Douglas District Office

503-252-2900

### Elementary Schools

Cherry Park 503-256-6501
Earl Boyles 503-256-6554
Gilbert Heights 503-256-6502
Gilbert Park 503-256-6531
Lincoln Park 503-256-6504
Menlo Park 503-256-6506
Mill Park 503-256-6507
Ventura Park 503-256-6508
West Powellhurst 503-256-6509

### Middle Schools

Alice Ott 503-256-6510
Floyd Light 503-256-6511
Ron Russell 503-256-6519

### High School

North Campus 503-261-8300
South Campus 503-261-8307
Fir Ridge 503-256-6530

*Information in this handout has been provided by:*
*Office of the Education Ombudsman. State of Washington*






# Aad Uga Faa'idayso Shirarka Waalidka-Macallinka
# Make the Most of Parent-Teacher Conferences

*A Guide for Families in the David Douglas School District*

# Ka Qayb Qaado Shirarka Waalidka-Macallinka

Dugsiyada badankooda waxaa ay qoys kasta ku casumaan shirka waalidka macallinka sanadkiiba mar. Shirka waa waqti ay waalidiinta iyo macallimiinta ay ku wadaagaan macluumaad, ku xalliyaan dhibaatooyin, oo ay ku sameystaan xiriir ka caawiya ardayda in ay guuleystaan. Ma aha in aad sugtid casumaad gaar ah. Xilli kasta ayaad codsan kartaa in aad kulan la yeelatid macallinka ilmahaaga si aad ugala hadashid horumarka xagga waxbarashada.

Macallinka waxaa uu u baahan yahay in uu adiga ku dhageysto adiguna waa in aad macallinka dhageysatid. Wax badan ayaad ka taqaan ilmahaaga marka ay noqoto dugsiga. Kala hadalka macallinka ee ilmahaaga ku saabsan waxaa uu ka caawinayaa u gogol xaaridda in ardaygaaga uu fasalka ku wanaagsanaado iyo in aad fahantid waxa fasalka lagu barto.

Shirarka ayaa caadi ahaan ah kuwo gaaban oo arrinka taagan xoogga saaraya. Tilmaamahan ayaa kaa caawinaya in aad ka faa'idaysatid waqtiga aad la qaadanaysid macallinka ilmahaaga.

# Qoraallada Shirka Waalidka-Macaalinka

Waxaad calaameysaa su'aalaha muhiimka kuu ah, waxaadna raacisaa kuwo kale. Foomkani shirka hore ugu qaado.

## SU'AALAHA MACALLINKA LA WEYDIINAYO

- ☐ Miyaad i tusin kartaa qaar ka mid ah waxyaabaha uu ilmahaygu qabtay?
- ☐ Miyuu ilmahaygu dhammeystiraa daruusta fasalka gudihiisa miyuuna keena daruusta uu aqalka uga soo shaqeeyo?
- ☐ Miyuu ilmahaygu ka qayb qaataa wada hadallada fasalka gudihiisa?
- ☐ Miyaad ku qanacsan tahay horumarka ilmahayga?
- ☐ Muxuu ilmahaygu ku fiican yahay? Waa maxay waxa uu ilmahaygu ku dhib qabo?
- ☐ Xaggeen caawinaad ka heli karnaa?
- ☐ Sidee ayuu ilmahaygu ugu dhaqmaa fasalka gudihiisa iyo garoonka lagu ciyaaro?
- ☐ Miyeey jireen isbeddelo dhawaan yimid ee ah in aan wax ka ogaado?
- ☐ Sidee wax u edbisaan?
- ☐ Waa maxay waxyaabaha aad ka filanaysid ilmahayga?
- ☐ Waa maxay imtixaanada aad sanadkan qaadeysiin? Sidee ayuu ilmahaygu ugu diyaar garoobi karaa?
- ☐ Miyeey jiraan mashruucyo waaweyn ee soo socda? Sideen u caawini karaa ilmahayga?
- ☐ Goorma ayaad soo dirtaa kaarka warbixinta darajooyinka?
- ☐ Waa maxay waxyaabaha dhibcooyinka darajada lagu saleeyo?
- ☐ Waa maxay qaabka ugu fiican ee aan uga wada xiriiri karno horumarka ilmahayga sanad dugsiyeedka gudihiisa?
- ☐ Imisa arday ayaa fasalka dhigata?
- ☐ Miyaad qabtaan qof macallinka caawiya? Miyaad fasalka u adeegsataan mutadawiciin waalidka ka tirsan ?
- ☐ Maxaad igula talin lahayd si aan uga qayb qaato hawlaha dugsiga, iyo in aan ka caawiyo ilmahayga in uu ku guuleysto waxbarashada.
- ☐ Miyaad i siin kartaa jadwalka kulannada waalidka iyo kulannada furan ee sanad dugsiyeedka?
- ☐ Sidee dhaqanka ilmahayga looga ra'yi bixiyaa xilliga waxbarashada ee fasalka?

### Goobta qoraalka

________________________________________

________________________________________

________________________________________

## WAXYAABAHA AAD MACALLINKA U SHEEGAYSID

- ☐ Sida ugu fiican ee ay ilmahaygu wax u bartaan.
- ☐ Isbeddel weyn ee qoyskayga la soo gudboonaaday — guri cusub, dad guriga ku cusub, geeri ama furriin.
- ☐ Xaalad caafimaad ee ilmahayga saameynaysa.
- ☐ Waxyaabihii hore ka caawiyey ilmahayga in ay waxbarashada ku guuleystaan.
- ☐ Waxyaabaha dugsiga iyo fasalka gudahiisa ee uu ilmahayga xiiseeyo.
- ☐ Waxa uu fasalkani ilmahayga ku dhib qabo.

### Goobta qoraalka

________________________________________

________________________________________

## QORSHOOYINKA AH IN LA DABAGALO

### Macluumaadka lagala xiriirayo macallinka

________________________________________

________________________________________

### Waxyaabaha ah in la sameeyo

________________________________________

________________________________________